Alberta

**War** saxaafadeed

# Maalgelin dheeraad ah oo loogu talagalay diiwaangelinta ardayda

Nofeember 28, 2023 Weydiimaha warbaahinta (Media inquiries)

## Dowladda Alberta waxay maalgelinaysaa $30 milyan doolar oo dheeri ah si ay awood u siiso maamulada dugsiyada inay si wanaagsan wax uga qabtaan kobaca diiwaangelinta.

Sanadkan, maamulada dugsiyada waxa ay la kulmayaan kubac diiwaangalin dheeri ka badan intii la filayey. Si loo taageero ardayda, dawladda Alberta waxay bixinaysaa $30 milyan doolar dheeraad oo maalgelin ah sanad dugsiyeedka 2023-24.
Maamulada dugsiyada waxey heli doonaan $1,500 doolar ardaygiiba si ay u korodho diiwaangelinta dhabta ah ee u dhaxaysa eber iyo 100 arday iyo kobaca 100 arday waxa lagu maalgelin doonaa $2,000 doolar ardaygiiba.

"Alberta waxay sii waddaa inay soo jiidato dadka Kanada iyo adduunka oo dhan. Waxaan aragnay dad badan oo Alberta ku cusub bilihii la soo dhaafay, taasoo la macno ah carruur badan oo iska diiwaan gelinaya dugsiyadeena. Waxaan ognahay in dugsiyadu ay wajahayaan cadaadis isdiiwaangelineed, sidaas darteed waxaan siineynaa maamulayaasha dugsiyada dhaqaale dheeraad ah si ay si wanagsan u taageeraan dugsiyada iyo ardayda. Maalgelintani waxay kabaysaa maalgelinta waxbarasho ee taariikhiga ah ee lagu sameeyay Miisaaniyadda 2023."

*Demetrios Nicolaides, Wasiirka Waxbarashasada*

Maalgelinta waxa loo qoondayn doonaa maamulada dugsiyada bisha Diseembar iyada oo loo marayo deeqda kobaca diiwaangelinta ee dheeriga ah. Sanad dugsiyeedka hadda socda, deeqda kobaca is-diiwaangelinta ee dheeriga ah ayaa wax laga beddelay si dhammaan maamulada dugsiyada ee la kulma korriinka ay hadda heli doonaan kharash dheeraad ah arday kasta. Sanad-dugsiyeedkii hore, kaliya maamulka dugsiga ee kobaca isdiiwaangelinta ee ka badan boqolkiiba laba ayaa xaq u lahaa deeqda. Sanad dugsiyeedka 2023-24, maamulada waxa loo qoondayn doonaa maalgelin ku salaysan sanad dugsiyeedkii hore ama qaacidada dib loo eegay, midka oo bixiya maalgelin dheeraad ah.

Classification: Public

"In badan oo ka mid ah guddiyada dugsiyada dadweynaha ee Alberta ee la soo doorto, Katooliga iyo kuwa Afka Faransiiska ku baxa waxay sii wadaan inay la kulmaan kobac isdiiwaangelineed oo la taaban karo iyo iyada, kororka kakanaanta ardayda u baahan taageerada caafimaadka maskaxda, barashada iyo faragelinta hore, iyo Ingiriisiga luqad dheeraad ah. Ururka Guddiyada Dugsiyada Alberta waxa ay qadarinayaan maalgalintan dheeriga ah ee ka timid dawlada si ay uga caawiso guddiyada dugsigu xaqiijinta guusha ardayda.

*Marilyn Dennis, Gudoomiyaha, Ururka Guddiyada Dugsiyada Alberta*

“Waxaan uga mahadcelineynaa in dowladdu ay ka jawaabeyso kobaca isdiiwaangelinta taariikhiga ah iyo adkaanshaha sii kordhaya ee guud ahaan dugsiyada Guddiga Waxbarasha Kaalgari (Calgry Board of Education- CBE). Maalgelintani waxay awood noo siinaysaa in aan shaqaaleysiino macalimiin dheeraad ah iyo shaqaale dugsiyada ku salaysan si ay u taageeraan ardayda."

*Laura Hack, Gudoomiyaha Guddiga, Guddiga Waxbarasha Kaalgari*

“Degmadeena waxaa ka muuqda kobac aan hore loo arag. Laga bilaabo Sebtembar 2022 ilaa Sebtembar 2023, is-diiwaangelinta ayaa kordhay 4.6 boqolkiiba, waxaanan sii wadeynaa soo dhaweynta ardayda cusub. Waxaan ka mahadcelineynaa maalgelinta dheeriga ah ee dowladda si ay u taageerto baahiyaha kala duwan ee ardaydeena sii kordheysa."

*Shannon Cook, Gudoomiyaha Guddiga, Qeybta Dugsiyada Katoliga ee Kaalgari*

"Waxaan ku dadaaleynaa inaan si sax ah u saadaalino saadaasha diiwaangelintayada, laakiin dhinacyada qaarkood lama saadaalin karo. Markaan ka saarno heerka boqolkiiba laba oo aan aqoonsanno arday kasta, waxaan heli doonaa maalgelin dheeraad ah si aan u maarayn karno dalabaadka. Doolar kasta oo aan galino ardaydeena waa maalgashi mustaqbalka Alberta. "

*Sandra Palazzo, Gudoomiyaha Guddiga, Qeybta Dugsiyada Katoliga ee Edmonton*

“Edmonton Public Schools is grateful for funding to support our classrooms as we grow by 5,000 students each year. We look forward to future conversations with the provincial government on the funding formula.”

*Julie Kusiek Gudoomiyaha Guddiga, Dugsiyada Dadweynaha Edmonton*

Saddexda sano ee soo socota, dawladda Alberta waxay siinaysaa in ka badan $820 milyan doolar qaybaha dugsiyada si wax looga qabto kobaca diiwaangelinta. Maalgelintan waxa loo

Classification: Public

isticmaali karaa in lagu shaqaaleysiiyo macalimiin dheeraad ah iyo shaqaale kaalmeeya fasalka, si maamulada dugsiyada u maareeyaan tirada fasalka iyo tirada sii kordhaysa ee ardayda. $126 milyan doolar oo kale oo maalgelin cusub ah ayaa la bixinayaa muddo saddex sano ah si mas'uuliyiinta dugsiyada ay ugu dari karaan taageerooyinka fasallada adag oo ay siiyaan ardayda waqtiga diiradda saaraya iyo dareenka ay u baahan yihiin.

## Xaqiiqado degdeg ah

- Diiwaanka sanad-maaliyadeedka 2023-24, $8.8 bilyan doolar ah ayaa lagu kharash gareynayaa waxbarashada, taasoo u dhiganta $44 milyan doolar maalin kasta ardaydu dugsiyada ku jiraan.
- Dowladda Alberta waxay ku maalgelinaysaa $2.3 bilyan doolar saddexda sano ee soo socota dugsiyada cusub iyo kuwa la casriyeeyay.
- Miisaaniyadda 2023, dawladda Alberta waxay ku dhawaaqday taageerada 58 mashaariicda dugsiyada ee mudnaanta leh kuwaas oo bixin doona boosas arday oo cusub oo horumarsan, abuurista shaqooyin iyo taageero bulshooyinka.
- Qorshaha raasamaal ee 2023 waxa ku jira $372 milyan doolar oo loogu talagalay 33 mashruuc dugsi si loo bixiyo boosas arday oo cusub oo horumarsan, shaqo abuur looguna soo nooleeyo bulshooyinka Alberta. Tan waxaa ka mid ah:
  - 10 dugsi oo cusub
  - 16 dugsi oo beddela
  - todoba casriyeyn
- Mashruucyadani waxay abuuri doonaan in ka badan 9,400 boosas cusub waxayna cusboonaysiin doonaan in ka badan 15,500 boosas arday ah.

## Warar la xiriira

- Taageerida arday badan oo fasalada (Supporting more students in classrooms | Appuyer un plus grand nombre d’élèves dans les classes) (Maarso 9, 2023)
- Maalgalin badan oo galaysa fasalada Alberta (More funding going into Alberta classrooms | Plus de financement pour les salles de classe de l’Alberta) (Mar 20, 2023)

## Warbaahinta kala duwan

- Daawo wararka shirarka (Watch the news conference)